Shirweynaha
**Badaha**
Soomaaliya

# Bayaanka Shirweynaha 1aad ee Badaha Soomaaliya

*Mowduuca*

*Horumarinta Mustaqbalka Badaha Soomaaliya:* ***Gobanimada, Amniga, Ganacsiga iyo Dhaqaalaha Buluugga***

Mogadishu Somalia

4-5 August 2026

Shirweynaha **1aad** ee **Badaha** Soomaaliya

# Bayaanka Shirweynaha 1aad ee Badaha Soomaaliya

## (Muqdisho, 4-5 Agoosto 2026)

### Gogoldhig

Sannado badan oo DFS ay ku taamaysay abuurista madal qaran oo lagu falanqeeyo siyaasadaha guud, culuumta, aragtiyaha iyo aqoonta soomaaliyeed ee la xiriirta hawlaha qaran ee khuseeya badaha, waxaa 04 & 05 Agoosto 2026 ku qabsoomay magaalada Muqdisho Shirweynaha 1aad ee Badaha Soomaaliya oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS oo uu hoggaaminayo Wasiir Cabdulqaadir Maxamed Nuur (Jaamac).

Ujeeddada guud ee shirweynaha ayaa ahayd in la unko madal qaran oo si sanadle ah loogu odoroso arrimaha sida tooska ah u taabanaya danaha Qaranka Soomaaliyeed ee la xiriira badaha, Dekadaha, Dhaqaalaha Buluugga, Gaadiidka Badda, Bi'ii'ada Badda, Ganacsiga iyo ka faa'ideysiga Kheyraadka Badda, waxaana ka soo qaybgalay guud ahaan bahweynta badleyda soomaaliya oo kulmisay wasaarado iyo hay'ado dowladeed, jaamacadaha iyo macaahidda sare ee dalka, saxiibada caalamka iyo ganacsatada ka shaqeeya arrimaha badda.

Shirka waxaa furay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, oo khudbaddiisi ku go'aamiyay in Shirweynaha Badaha Soomaaliya uu noqdo mid sannadle ah oo si joogta ahna loo qabto. Waxaana gabagabadii shirka soo xiray Resalwasaaraha JFS, Mudane Xamse Cabdi Barre.

## Soojeedinta Shirweynaha

Shirweynuhu waxa uu u soo jeediyay talooyin muhiim ah oo ku aaddan arrimihi lagu gorfeeyay shirka waxaana ugu muhiimsanaa qodobada kasoo baxay:

## Siyaasadaha qaran ee khuseeya badda:

1. Diyaarinta iyo soo saarista istiraatiijiyadda qaran ee badaha oo qeexaysa ujeeddooyinka iyo hiigsiga qaran ee ku aaddan Difaaca iyo Amniga Badda; Dhaqaalaha Buluugga ah; Dekadaha, Gaadiidka iyo Isgaarsiinta Badda; Dhowrista Deegaan Badeedka iyo Diblumaasiyada lama huraanka u ah ilaalinta iyo dheefsiga badaha soomaaliyeed.

2. Abuurista iyo hawlgelinta Golaha Qaran ee badaha oo ay xubno ka noqonayaan wasaaradaha iyo hay'adaha qaran ee ku shaqada leh arrimaha badaha; golahaas oo yeelanaya guddi farsamo oo ay xubno ka noqonayaan khubaro sare oo aqoon iyo khibrad fiican u leh hawlaha qaran ee la xiriira badaha.

3. Mudnaansiinta hawlaha qaran ee khuseeya badaha mar walba oo la dajinayo qorshayaasha guud ee qaranka iyo miisaaniyad sannadeedka dowladda.

4. Dardargalinta, curinta iyo dib-u-eegista shuruucda dalka ee khuseeya badaha iyada oo la xaqiijinayo in ay noqdaan kuwo la jaanqaadaya dastuurka dalka, shuruucda caalamiga ah iyo ujeeddooyinka hortabinta u leh Amniga Qaranka Soomaaliyeed.

## Amniga iyo Difaaca Badda:

5. Xoojinta iyo tayaynta Ciidanka Badda Soomaaliyeed, iyada oo laga haqabtirayo dhamaan baahiyaha aasaasiga u ah gudashada waajibaadkooda Qaran sidoo kalena mudnaan gaar ah la siinayo tayayntooda iyo hawlgallada ay ku xaqiijinayaan difaaca biyaha iyo kheyraadka ku jira.

6. Tayaynta ciidanka ilaalada xeebaha ee Booliska Soomaaliyeed iyo in loo qoondeeyo tashiilaadka gaarka ay u baahanyihiin si loogu maareeyo tayayntooda si wanaagsanna ugu gutaan Waajibka kaga aaddan ilaalinta amniga xeebaha Soomaaliyeed.

7. Abuurista iyo kor-u-qaadista cilmibaarista la xariirta amniga badaha Soomaaliyeed iyo soo saarista warbixinno,maqaallo,siyaasado iyo jiheyn la xariirta badaheenna, iyada oo Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga oo si joogta ugu qeybqaadanayo arrimahan.

## Iskaashiga DFS & Dowladaha Xubnaha ka ah ee khuseeya Badaha:

8. Qabashada kulan-hawleed lix-biloodle ah oo ay isugu imanayaan wasaaradaha iyo hay'adaha ku shaqada leh arrimaha badda ee labada heer dowladeed, si joogta ahna loogu qaabaynayo iskaashiga heerarka kala duwan ee dowladda.
9. Abuurista koox-hawleedka wakiillada DFS iyo dowladaha xubnaha ka ah oo si joogta ah uga shaqaynaya xiriirinta iyo iskaashiga khuseeya arrimaha badda.

## Diblumaasiyadda Badaha:

10. Mideynta dadaallada iyo diblomaasiyadda la xiriirta Badaheena iyada oo arrinkan ay Hogaamineyso Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ee JFS, si aanan wax u dhimeyn Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dowladda ee sida tooska ah ugu shaqada leh arrimaha Badda.
11. Abuurista kayd diblumaasiyadeed gaar u ah arrimaha badaha iyo hawlaha qaran ee la xiriira.
12. Taabbagelinta ergada DFS ee ku matalaysa Ururka Caalamiga ah ee Badaha (IMO) iyada oo laga haqabtirayo baahiyaha farsamo iyo kuwa maaliyadeed, laguna kabayo khubarada iyo hawlwadeennada lama huraanka u ah hawlahooda.
13. Mudnaansiinta ka qayb galka iyo ka faa'iidaysiga fagaarayaasha caalamiga ah iyo kuwa heer gobol ee lagaga arrinsanayo arrimaha badaha iyo iskaashiga la xiriira.
14. Meelmarinta xeerarka caalamiga ah ee khuseeya badaha iyo ku biirista kuwa kale ee loo arko inay u adeegayaan danaha Qaranka.
15. Abuurista Madasha Khubarada Soomaaliyeed ee Qaanuunka Caalamiga ah ee la xiriira badaha iyo isku xirkooda iyada oo si joogta ah looga faa'iidaysanayo xilliyada aan laga maarmin loona samaynayo madal u gaar ah oo ay ku kulmaan.

## Dekadaha iyo Gaadiidka Badda:

16. Dhisidda Hay'adda/Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed iyo dhammaystirka iyo meelmarinta sharcigii lagu aasaasi lahaa.

17. Casriyaynta dekadaha dalka, sida ay u shaqeeyaan iyo kobcinta dekadaha u gaarka ah kalluumaysiga.

18. Abuurista gaadiid badeed isaga kala goosha goballada dalka loona adeegsado safarrada, daabulista shixnadaha iyo dalxiiska.

19. Dhiirrigelinta ganacsatada soomaaliyeed ee ka shaqeyeeya gaadiidka badda, iyada oo gacan laga siinayo xal-u-helidda caqabadaha haysta iyo fududeynta maalgashiga la xariira arrimahan.

20. Dib-u-qiimaynta heshiisyada dekedaha ee lagula jiro shirkadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah.

## Dhaqaalaha Buluugga ah & Deegaanka Badda:

21. Ka hortagga iyo la dagaalanka kalluumeysiga sharci darrada iyo noocyada kala duwan ee dikhowga badda si loo dhowro deegaanka iyo noolaha ku jira badaha Soomaaliya.

22. Kor u qaadista ka faa'iidaysiga khayraadka badda ee kala duwan iyada oo la abuurayo mashaariic qaran oo waaweyn oo kor loogu qaadaayo heerka ka faa'iidaysiga dhaqaalaha bulluugga ah.

23. In la xoojiyo u diyaargarowga saameynta iyo isbaddalka cimiladda iyada oo laga shaqeynayo barnaamijyo iyo mashaariic la xarriira arrimahan, si kor loogu qaado adkaysiga loogana hortago khasaaraha ka imaan kara isbaddalka cimilada

.

## Tacliinta iyo Culuumta Badda:

24. Taabbagelinta Machadka Soomaaliyeed ee Badaha, iyada oo loo qoondaynayo Miisaaniyad Sannadeed joogta ah oo lagu socodsiiyo hawlihiisa.

25. Dhisidda iyo Taabbagelinta Jaamacadda Difaaca Qaranka.

26. Abuurista kulliyad madaxbannaan oo ay yeelato Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo lagu qaato tacliinta sare ee khuseysa badaha, iyada oo loo qoondaynayo miisaaniyad ku filan; si loo helo aqoonyahano ku filan hawlaha qaran ee la xiriira badaha.

27.Diyaarinta iyo soo saarista Qaamuuska Culuumta Badaha oo af Soomaali ku qoran.

28. Xoojinta cilmibaarista hawleed ee la xiriirta hawlaha badda iyada oo lagu jaangoynayo baahiyaha hawleed ee hortabinta leh.

29. Abuurista Madasha Khubarada iyo aqoonyahanka soomaaliyeed ee ku takhasusay culuumta badda iyo tacliinta xiriirka dhaw la leh, iyo in loo sameeyo madal cilmiyeed gaar ah oo ay ku wada xiriiraan.

## Shirweynaha Badaha Soomaaliyeed:

30. In si sannadle ah loo joogteeyo qabashada Shirweynaha Badaha Soomaaliyeed iyada oo la fulinayo go'aamintii Madaxwaynaha JFS, Dr. Xassan Sheekh Maxamuud, laguna horumariyo aragtiyaha iyo siyaasadaha saldhigga u ah horumarinta hawlaha qaran ee badaha la xiriira, loona qoondeeyo miisaaniyad sannadle ah oo lagu fuliyo.

Ugu dambayn, Shirweynuhu waxa uu u mahadcelinayaa madaxda qaranka oo ay ugu horreeyaan Madaxweynaha JFS, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud iyo Raysalwasaaraha JFS, Mudane Xamse Cabdi Barre, wuxuuna ka codsanayaa in bayaankan loo rogo Go'aan Gole Wasiirro, lana tixgeliyo mar walba oo la soo saarayo siyaasado, shuruuc, iyo qorsheyaal qaran oo  ee badaha la xiriira.

**EBBAA MAHADLEH**

**Shirweynaha 1aad ee Badaha Soomaaliyeed**

*Muqdisho, 04-05 Agoosto 2026*